



DAWLAD GOBOLEEDKA WAQOYI BARI
SOOMAALIYA

BARNAAMIJKA XUKUUMADDA 2025-2030







**DAWLAD GOBOLEEDKA
WAQOQYI BARI SOOMAALIYA**

“

**DIFAAC
IYO
DAWLAD DHIS**

BARNAAMIJKA XUKUUMADDA

2025-2030

Mahadnaq iyo Hordhac



Waxaa mahad oo dhan u sugnaatay Allaha Wayn (SW), ka dibna waxaan u mahad celinyaa dhamaan inta garab iyo gaashaan u noqotay dhismaha iyo xoraynta Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya oo ay ugu horreeyaan shacabka reer Waqooyi Bari iyo madaxda Qaranka. Dadaalkii dheeraa ee soo jiray iyo halgankii labadii sano ee u danbaysay ka dib waxa inoo dhamaystirantay dhismihii dawlad goboleed kulmiyay

dadka Soomaaliyeed ee daga Sool, Sanaag iyo Togdheer, maantana xubin buuxa ka ah nidaamka federaal ka ah ee Soomaaliyeed.

Sabti, 30kii August' 2025, oo ku beegnayd 6dii bisha Rabiicul-Awal ee Hijriga sannadka 1447, waxay ahayd maalin xasuuus gaar ah u lahayd dadka reer Waqooyi Bari Soomaaliya, Waa maalintii ay xubnaha Golaha Wakiillada ee DGka Waqooyi Bari ay ficil u badalleen dareenkii shacbiga ay matallaan islamarkaana ay ii doorteen Madaxwaynaha 1-aad ee DG Waqooyi Bari, Soomaaliya. Haddaba si loo xaqiijiyo himilada shacabka reer Waqooyi bari ayaa waxaa uu barnaamijkan xukuumadda tilmaamayaa hawlaha hortabinta u leh xukuumadda Madaxwayne Cabdiqadir ee la fulin doono shanta sano ee 2025-2030.


Sida uu dhigayo qodobka 68aad ee Dastuurka Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya, ee tilmaamaya awoodaha iyo waajibaadka, waxa uu ku waajibinayaa Golaha Fulinta oo uu madaxwaynuhu hogaaminayo diyaarinta iyo dejinta qorshaha guud ee lagu horumarinayo Dawladda Waqooyi Bari. Sidoo kale, Qorshaha Barnaamijka Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari waxa uu ka duulayaa balanqaadyadii Madaxwaynaha ee sugida amniga deegaanada Waqooyi Bari, daadajinta maamulka iyo doorashooyinka, kobcinta dakhliga, kaabayaasha dhaqaaalaha, iyo wax-soo-saarka, dhamaystirka garsoor leh heerar kala duwan, ka qayb-noqoshada dar-dargalinta federaalaynta dalka, iyo bixinta adeega caafimaadka iyo waxbarashada aasaasiga ah.

Intaas waxaa dheer in Barnaamijka xukuumadda Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari uu la jaanqaadayo Qorshaha Isbeddelka Qaranka ee 2025 ilaa 2029 kaasoo dajinaya hindisiyaal leh hadafyo la cabiri karo iyo waqtiyo qorshaysan oo gaadhsiin kara dadka Soomaaliyeed amni sugan, deganaansho siyaasadeed, kobac dhaqaale, iyo horumar bulsho. Qorshaha Isbeddelka Qaranka waxuu leeyahay afar (4) tiir oo kala ah Isbedelka Dawlad Wanaaga, kobcinta Dhaqaalaha, horumarinta Arrimaha Bulshada, iyo arrimaha Isbeddelada Deegaanka.

Barnaamijka Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya waxaa si gooni ah loogu saleeyay mudnaanta baahiyaha ka jira deegaanka iyo bulshooyinka Waqooyi Bari taasoo lagu salaynayo miisaaniyad sannadeedka shanta sano ee Madaxwaynaha iyo Golaha Fulinta dastuurku u igmaday.

Si la isugu dhafo barnaamijyada mudnaanta u leh deegaanka iyo dadka Waqooyi Bari Soomaaliya iyo Qorshaha Isbeddelka Qaran ee 2025 ilaa 2029, loona gaadho harumar la taaban karo. Barnaamijka Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya wuxuu ka amba qaadayaa qiimayn lagu sameeyay qorshihii labada sano ee maamulkii SSC-Khaatumo, casharadii laga bartay dawlad goboleedyada Dalka iyo qorshayaashooda horumarineed, iyadoo laga baaraan dagay arrimaha amniga, siyaasadda, dhaqaalaha, caafimaadka, bulshada qaybahooda kala duwan, qurbajoogta, iyo deeqbixiyayaasha caalamiga, hadaba barnaamijkan xukuumaddayda ee shanta sano 2025-2030 ayaa ku salaysan lixdii tiir ee barnaamijkii doorashada, waxaana Allah ka rajaynayaa in uu ina waafajiyo hirgalkiisa.

Madaxwaynaha Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya
Mudane: Cabdiqaadir Axmed Aw-Cali





TUSMO

Mahad naq iyo Horudhac	4
Tiirka 1aad – Amniga iyo Cadaaladda	7
Tiirka 2aad – Daadajinta Dawladda iyo Dimoqraadiyanta	10
Tiirka 3 aad – Horumarinta dhaqaalaha	12
Tiirka 4 aad - Adeegga Bulshada	16
Tiirka 5,aad: XAQIJJINTA MAAMUL WANAAAGGA IYO CIRIB TIRKA MUSUQA	21
Tiirka 6,aad: TAYAYNTA GARSOORKA IYO XAQIJJINTA CADAALADDA	22
Gunaanad	23
Lifaaqa 1'aad – Qorshe Hawleedka Golaha Wasiirrada	24

Tiirka 1, aad- ADKAYNTA DIFAACA IYO SUGIDDA AMNIGA

Tiirka koobaad waxaa saldhig u ah Ilaalinta dhulka iyo karaamada shacabka Waqooyi bari.

Halbeegyada hortabinta u leh Barnamijka Xukuumadda Madaxweyne Abdikadir Ahmed Aw-Ali tiirka koobaad waxaa saldhig u ah Ilaalinta dhulka, karaamada shacabka Waqooyi bari iyo xaqiijinta deegaan amni ah, xasilloon oo gaadha nabad waarta.

Difaaca dadka iyo xoojinta amniga Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari waa mudnaanta koowaad ee heerarka kala duwan ee Dowladda, iyada oo diiradda la saarayo dhammaystirka shuruucda iyo xeerarka, horumarinta awoodda/itaalka hay'adaha amniga, dib-u-qaabayntooda, iyo helidda maalgelin lagu xaqiijin karo isku filnaansho misaanayadeed.

Difaaca iyo sugidda amnigu waa tiirka ugu muhiimsan ee nolosha bulshada, la'aantiis, aan la gaadhi karin horumar la taaban karo. Sidaas darteed, sugidda amnigu waxay u taagantahay waajibka ugu mudan ee saaran dowladda, waana arrin lagula xisaabtami doono dhammaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha amniga. Iyadoo la tixgelinayo dadaalladii hore loo qaaday, hadaba waxaan u jihaysanaynaa dhabbaha lagu xaqiijin karo deegaan nabdoon, xasilloon, kana xor ah argagixiso, colaad, iyo amni darro.

Hadafka Xukuumaddu waa in ay xaqiijiso in muwaadin kasta oo ku nool degaannada Waqooyi Bari Soomaaliya, uu si buuxda uga xoroobo cabsi iyo khatar ku timaadda naftiisa, maalkiisa, sharafkiisa, xuquuqdiisa iyo xorriyadiisa iyadoo dhammaan dadka si siman loogu xaqiijinayo adeegaas. Sidoo kale, Xukuumaddu waxay xil gaar ah iska saareysaa in ay sugto nabadgelyo ka hirgasha deegaanka oo dhan, ha ahaato bad iyo barri, miyi iyo magaalo, taasoo saldhig u noqon doonta in la helo bulsho ka dareen la' cabsi, dulmi, iyo khalkhal amni.

Wasaaradaha iyo hay'adaha kala duwan ee Xukuumadda Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari waxay hirgelin doonaan adeeg hufan oo horseeda isbeddel amni iyo mid difaac oo muuqda. Waxqabadka Xukuumadda wuxuu noqon doonaa dhaqan sal adag leh, waxaana lagu qiimayn doonaa heerka horumarka aan ka gaadhnno dib u xoreynta deegaankeena iyo sugidda amniga guud ee shacabka Waqooyi Bari Soomaaliya.

Wasaaradaha, Hay'adaha amniga, iyo saraakiisha u xilsaaran sugidda amniga dalka waxaa ay ka shaqeyn doonaan in ay dajiyaan siyaasadda amni ee maamulka, oo ay weheliyaan qorsheyaal iyo istaraatiijiyado wax ku ool ah oo si cad u qeexaya waajibaadka difaaca iyo sugidda amniga. Siyaasadda difaaca iyo sugidda amnigu waa in ay diiradda saarto xasilinta deegaanka, tayeynta ciidamada maamulka, helista xog iyo xuuraan looga hortago falalka amni-darro ee lidka ku ah shacabka, iyo hirgelinta barnamijta Wada xoraynta deegaanka.



Tiirka Difaaca iyo sugidda amniga wuxuu ka mid yahay tiirarka saldhigga u ah Barnaamijka Xukuumadda. Tiirkani wuxuu door hoggaamineed ka qaadanaaya hagidda, isku-duwidda, la socodka, iyo qiimeynta qorshayaasha ilaalinta dhulka, karaamada shacabka iyo sugidda amniga deegaanka. Sidoo kale, tiirku wuxuu xoojinayaa dib-u-dhiska iyo tayeynta hay'adaha difaaca iyo amniga ee heer maamul goboleed, isagoo si dhow ula shaqeynaya wasaaradaha, hay'adaha Waqooyi Bari, dowladda Federaalka iyo beesha caalamka. Sidoo kale tiirku wuxuu xoojinayaa hannaanka korjoogteynta wasaaradahu ay ku leeyihiin hay'adaha hoos yimaada.

Xukuumaddu waxey ka shaqayn doontaa in la sameeyo dadaal dheeri ah oo lagu abaabulayo qeybaha kala duwan ee bulshada. Waxaa waajib ah in dhammaan madaxda heerarka kala duwan ee dowladda ha ahaadeen heer gobol, dagmo and magaalo/tuulo ay si wadajir ah ula shaqeeyaan ururrada bulshada, haweenka, dhalinyarada, iyo culimaa'udiinka, si loo fuliyo qorshaha dib-u-xoreynta, difaaca iyo sugidda amniga kaas oo horseeda xasilinta iyo nabad ku noolaanshaha deegaannada dowlad goboleedka Waqooyi Bari oo dhan. Iskaashigan wadajirka ah ayaa saldhig u noqon doona guusha dadaallada amni iyo dib-u-dhis.

Waxaan si buuxda u ognahay in amni-darrada dalka ay si kala duwan u saameeyso deegaannada kala geddisan. Sidaas darteed, Xukuumaddu waxay xoogga saari doontaa xoojinta nabadda meelaha amniga leh, iyadoo isla markaana dadaal gaar ah lagu bixinayo sidii nabad waarta looga hirgelin lahaa deegaannada ay weli ka jirto amni-darro.

Xukuumaddu waxay mudnaan gaar ah siinaysaa qoondeynta dhaqaale ku filan oo lagu fulinayo howlaha dib-u-xoreynta gobollada iyo deegaannada iyo sugidda amniga guud. Sidoo kale, waxaa la meelmarin doonaa qorshayaal istaraatiiji ah oo lagu hubinayo xasiloonaada iyo deganaashaha deegaamada maamulka, kuwaas oo saameyn toos ah ku yeelan doona dhaqaalaha, isu socodka iyo xakamaynta hubka.

Xukuumaddu waxay ka shaqeyn doontaa sidii aan uga faa'iideysan lahayn qaab-dhismeedka Amniga Qaranka (NSArch) ee la ansixiyay bishii Maarso 2023 kaas oo ah heshiiska siyaasadeed ee saldhigga u ah horumarinta iyo dib-u-habaynta hay'adaha amniga ee Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, iyada oo xoogga la saarayo wada shaqeynta, isku dhafka ciidamada amniga Soomaaliyeed (SSF), iyo hirgelinta qaab-dhismeed amni oo ay Soomaaliya leedahay ayna hoggaamiso fulintiisa.

Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Xukuumadda waxa ay dariiq kasta oo suuragal ah u mari doontaa sidii loo xaqiijin lahaa gacan ku haynta degmada Ceerigaabo, si shacabka sida gardarrada ah looga barakiciyey ay ugu laabtaan guryahooda si nabad ah.
2. Xukuumadda waxaa ka go'an in ay casriyeyso dhismaha ciidanka difaaca iyo kan Amniga, si loo helo ciidan leh tiro ku filan, tayo sare leh, daryeel joogto ah, tababar casri ah, iyo qalab dhameystiran oo u suurtageliya gudashada waajibaadkooda gobol iyo kan qaranba.
 - a. Tiro iyo Tayo: In la helo ciidan deegaanka ah oo la tababaray, la qalabeeyay, lana daryeelo.
 - b. Dib u habayn: In la dhiso xidhiidh iyo wada shaqayn toos ah oo u dhexeeya ciidamada Dawlad Goboleedka Waqooyi bari iyo Dowladda Federaalka.
3. Waxaan horumarinaynaa hay'adaha amniga si ay u gutaan waajibaadkooda, una sugaan amniga guud ee deegaanka, ugana hortagaan dhammaan falalka lidka ku ah nabadda, xasilloonida, iyo badbaadada muwaadiniinta Waqooyi Bari.
 - a. Dib-u-habeyn sharci ku saleysan: In la dhiso hay'ado amni oo lala xisaabtami karo, lehna hufnaan iyo kalsooni dadweyne.
 - b. Korjoogteyn iyo isla xisaabtan: In Wasaaradaha Maamulku ay si toos ah ula socdaan hay'adaha hoos yimaada.
4. Dib u-eegista Siyaasadda difaaca iyo sugidda amniga ee qeexaysa istraatiijiyadaha iyo qorshayaasha lagu hagayo amniga dowlad goboleedka Waqooyi Bari.
5. Dib u habaynta hay'adaha amniga si ku salaysan heshiis bulsho iyo sharci.
6. Dardar-gelinta hawlihii socday ee dib-u-habaynta ciidamada iyo hay'adaha korjoogtaynta amniga.
7. Qorshayaasha Xukuumadda ee Dib-u-xoraynta iyo xasilinta deegaanada Waqooyi Bari.
8. Dib-u-eegista siyaasadda amni ee maamulka si loo qeexo istaraatiijiyadda guud
9. Dhisidda nidaam sharci oo lagu maamulo hubka iyo ciidanka.
10. Xukuumadda Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari waxay u taagan tahay in ay xoreyso dhammaan dhulkeeda, sugto amniga shacabka, dib u dhiso hay'adaha amniga, una horseedo bulsho nabad ah oo xasilloon.



Tiirka 2,aad- SIYAASADDA & DIMUQRAADIYANTA

Tiirka labaad Waxaa saldhig u ah ilaalinta midnimada reer Wqooyi Bari, iyo ka qayb qaadashada midnimada umadda Soomaaliyeed.

Aragtida xukumaadu waxa ay ku salaysantahay in la dhiso dowlad goboleed xasiloon, lala xisaabtami karo, qabata baraamij wax-ku-ool ah oo si joogto ah u gaadhsiisa muwaadiniinta adeegyada aasaasiga ah. Tiirka siyaasaddu waxa uu u taagantahay isku-duubni bulsho oo lagu xoojinayo wadahalal loo dhan yahay, isla markaana noqda mid ka mid ah federaal Soomaaliyeed oo isku-duuban.

Tiirkani waxa uu horseedi doonaa in la kala cadeeyo doorka hay'adaha, korna loo qaado arimaha wada tashiga, si wasaarad walba, hay'ad walba, ama xafiis walba ay u yeelatto awood iyo karti ay ku fuliso waajibaadkeeda.

In awoodda iyo mas'uuliyadaha la daadajiyo, la qeexo isla markaana lagu heshiiyo waxa ay horseeddaa in laga gudbo ku tiirsanaanta taageerada shisheeyaha, wuxuuna dhisaa awood iyo is xilqaan dadka dhexdiisa ah, waxaa abuurma isku tashi lagu maamulo laguna fuliyo howlaha dawladda. Tiirkani waxa uu diiradda saarayaa fulinta qodobada dastuurka ku dhigan, wuxuuna yaraynayaa jahwareerka maamulka. Waxaa tiirkan aasaasi u ah in ay hirgasho awood siinta dawladda hoose si ay u maareeyaan miisaaniyadooda, u sugaan amnigooda, u dhiirri galiyaan ka qayb qaadashada bulshada ee dhamaan adeegyada dawladda, ugana jawaabaan baahiyahooda deegaan ee gaarka ah, taasoo kordhinaysa lahaanshaha iyo isla-xisaabtanka heerarka hoose ee ay dawladdnimadu ka soo unkanto.

Tiirkani waxa uu xoojinayaa isku-xidhka bulshada, waxa uu ka shaqaynayaa in la hubiyo in dhammaan qaybaha bulshadu wada socdaan, lana dhiso kalsooni ka dhexeysa dawladda iyo muwaadiniinta. Waxaa muhiim ah in la dajiyo istraatiijiyadda nabadaynta dadka iyo deegaannada Waqooyi Bari Soomaaliya, kaas oo kaabaya dib u midaynta dadka Soomaaliyeed iyo ka shaqaynta midnimo ka dhacda dalka Soomaaliya.

Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Hirgelinta Qaybinta Shaqooyinka (Functional Assignments) si wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawlad Goboleedku u yeeshaan waajibaad si cad u qeexan iyo awood fulin, wa in la sameeyaa xeerka kala xadaynta awoodaha iyo masuuliyadaha hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan.
2. Xoojinta Hoos-u-daadejinta Maaliyadeed:
 - In la dhiso nidaam dakhliga gudaha (canshuuro, rukhsadaha ganacsiga, iwm).
 - In la sharciyeeyo hab-wadaagga dakhliga toosan (Gobol-Dagmo-Federaal) oo ku salaysan dastuurka.
 - In la dhiso kartida farsamo ee wasaarada maaliyadda ee dhinaca miisaaniyad dajinta, daba-galka, iyo daah-furnaanta.
3. Si loo hirgaliyo wada noolaansho siman oo lala yeesho maamul goboleedyada dariska la ah Waqooyi Bari Soomaaliya, waxaa la xoojin doonaa dadaallada wada hadal ee ka dhexeeya bulshada walaalaha ah.
4. Waxaa uu Madaxwaynuhu magacaabi doonaa guddi u xil saaran arrimaha wada hadallada Gooni Goosatada Waqooyi Galbeed (Somaliland).
5. In ay xukuumadu abuurto madal Wadatashi Joogto ah oo ay qayb ka yihiin hogaanka dhaqanka, culimada, ururada bulshada, dhalinyarada iyo haweenka.
6. In la qabto doorashooyin goleyaal degmo oo xor iyo xalaal ah si loo helo matalaad loo dhan yahay (haween, dhalinyaro, iyo beelaha laga tirada badanyahay).
7. In dhamaadka shanta sano la qabto doorashooyin qof iyo cod ah oo heer Dawlad Goboleed ah.
8. In la abuurto hannaanka Jawaab-celinta Dadweynaha oo lagu fulinayo hanaan kulammo dadweyne joogto ah iyo marinada dijitaalka ah ee talo-bixinta/isla-xisaabtanka.
9. Si hoos loogu daadejiyo adeegyada caafimaadka & waxbarashada, waxa ay xukuumaddu awood iyo miisaaniyadda ku munaasabka ah u daadajinaysaa degmooyinka si ay u maareeyaan xarumaha hoos/dhexe.
10. Waxaa la ansixin doonaa sharciga Dowladaha Hoose ee Waqooyi Bari.
11. Waxaa la qaban doonaa cilmi baadhis iyo wada xaajoodyo looga heshiinayo hannaanka wadaagga dakhliga (Gobol, dagmo iyo Federaal).
12. Waxaa la baahin doonaa aqoonta dadwaynaha ee Dastuurka Waqooyi Bari.
13. Waxaa tababar maamulidda miisaaniyadaha ah la siin doonaa golayaasha degmooyinka.
14. Waxaa laga heshiin doonaa hannaanka wadaagga dakhliga ee heerarka kala duwan ee dawladda.



Tiirka 3, aad: HORUMARINTA DHAQAALAHA

Tiirkan waxaa saldhig u ah kobcinta dakhliga iyo ka faa'i day-siga khayraadka dabiiciga ah (Bad iyo Berri).

Tiirka Horumarinta Dhaqaalaha ee Barnaamijka xukuumadda Waqooyi Bari waxa uu dajinayaa qorshaha lagu horumarinayo qeybaha kala duwan ee dhaqaalaha sida, beeraha, xoolaha, kalluumeysiga, kaabayaasha dhaqaalaha iyo ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyada oo loo marayo dib-u-habeyn bartilmaameed leh iyo xeelado dhaqaale oo ballaadhan.

1. Kor-u-qaadidda dakhliga gudaha iyo xakamaynta kharashaadka

Kor-u-qaadidda dakhliga gudaha waxay diiradda saareysaa hirgelinta casriyaynta hannaanka uruurinta canshuuraha si loo helo miisaaniyad daboooli karta kharashaadka adeegyada bulsho iyo mashaariicda horumarinta. Dakhliga gudaha ee kaliya SSC sanadka 2024/2025 waxuu gaadhay \$11 milyan, halka qoondada miisaaniyadu ay ahayd \$23 milyan taasoo dabooshay boqolkiiba konton (50%) adeegyada hortabinta leh.

Maadaama uu dhamaystirka dawlad goboleedka Waqooyi Bari uu hadda gaadhay Sanaag, Sool, iyo Togdheer, waxaa lama huraan ah in la helo dakhli ku filan oo keena waaritaan miisaaniyadeed iyo adkeysiga dhaqaalaha iyada oo loo marayo dib-u-habeynta maaliyadda bulshada, kobcinta dakhliga, iyo casriyeynta waaxda maaliyadda. Si loo gaadho arrimahaan, Barnaamijka xukuumadda Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari waxa uu xoojineyaa balaadhinta qorshaha canshuur aruurinta berriga ee dakadaha qalalan. Xukuumada Waqooyi Bari waxay dhisaysaa kastamka canshuuraha ay la wadaagto Itoobiya iyo Dawlad Goboleedyada kale.

Si loo yareeyo ku-tiirsanaanta deeq-bixiye'yaasha loona helo miisaaniyad isu dheelli tiran, qorshuhu waxuu diirada saarayaa canshuurta ganacsiyada dhexdexaadka ah ee gaarka loo leeyahay iyo xakamaynta kharashaadyada. Xukuumada Waqooyi Bari waxay xoogga saari doontaa in ay daboosho kharashaadka hortabinta leh sida amniga, waxbarashada iyo caafimaadka. Waxaa muhiim ah in la xusso in hannaanka xakamaynta kharashaadku ay tahay mid uu waajibinayo qorshaha Isbeddelka Qaran ee 2025 ilaa 2029 ee dawladda Federaalka Soomaaliya, kuna astaysnaa fulinta habka dayn-cafinta (HIPC) ee hay'adda lacagta adduunka IMF, sidaa darteed dawlad goboleedka Waqooyi Bari waxa cashar ka soo minguurin kartaa habka ay wasaaradda maaliyadda federaalku u xakamaysay kharash bixinta dawladda.

Tiirkani waxa uu ku hagayaa Xukuumada Waqooyi Bari in la yareeyo saboolnimada, isla markaana la helo miisaaniyad dhaqaale oo lagu fulin karo barnaamijyada qorshaysan. Warbixinta ay isla daabaceen Hay'ada Istaatistikada Qaranka iyo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada 2024 waxay tibaaxaysaa in, in ka badan boqolkiiba lixdan iyo todobo (67%) ay dadka Soomaaliyeed ku nool yihiin saboolnimo, ay quutaan labo dollar (\$2) maalintii,

halka dadka reer miyiiga ah ay cabirka saboolnimadoodu gaadhayso boqolkiiba sideetan iyo kow (81.5%) ayna quutan in ka yar \$1 doolar maalintii.

Waxaa hadaba xusid mudan in dadka reer Waqooyi Bari ay u badanyihiin dad reer guuraa ah oo noloshoodu ku xidhan tahay xoolaha nool. Waqooyi Bari waa deegaan ay ku nool yihiin dad dhallinyaro ah, iyadoo qiyaaskii in ka badan 70% da'doodu ka yartahay 30 jir. Haddaba, saboolnimada iyo shaqo la'aantu waxay sababi kartaa in ay hayaamaan ayagoo raadinaya nolol dhaanta mida ay ku jiraan.

2. Kobcinta Dhaqaalaha Xoolaha iyo Beeraha

Iyadoo laga duulayo yaraanta sugnaanta cunada ee caalamiga ah, kana faa'iidaynayna khayraadka muuqda ee Waqooyi Bari ceegaaga, waxay xukuumada Waqooyi Bari xooga saari doontaa raadinta suuq gaynta xoolaha iyo beerida dalagyada daruuriga ah. Waqooyi Bari waxay leedahay xoolo aad u badan oo u baahan in loo helo suuq joogto ah. Si looga midha dhaliyo iibgaynta xoolo tartan iibgayn yeelan kara, waxay xukuumadu dhiirigalinaysaa in la helo ganacsato maalgaliya cayilinta iyo dawaynta xoolaha, raadinta suuq loo iibgeeyo, iyo beerida cawska nafaqada leh ee xoolaha. Ganacsatadaas waxay xukuumadu ku taageeri doontaa helitaanka dhul laga beero cawska nafaqada leh iyo canshuur dhaaf.

Dhulka Waqooyi Bari waa dhul balaadhan oo ay ka bixi karaan dalagyada daruuriga ah oo loo iibgayn karo deegaannada kale ee ay Soomaalidu dagto. Xukuumadu waxay mudnaan gaar ah siinaysaa ganacsatada beeraha si ay u soo saaraan dalagyada cunnada daruuriga ah si loo gaadho isku-filaansho nololeed. Xukuumadu waxay ku taageeraysaa ganacsatada beeraha, qodista ceel biyoodyo waraabin kara dhul balaadhan marka ay beerayaan cunnada daruuriga ah sida hadhuudhka, galayda, iyo baradhada.

a. Kobcinta Dhaqaalaha Kalluumeysiga

Waqooyi Bari waxay leedahay marin badeed dheer oo isku xidha Gacanka Cadmeed iyo Badwaynta Hindiya taasoo muhiim u ah kobaca dhaqaalaha, damaanadda cuntada, iyo abuurista fursad shaqo. Qorshaha Xukuumada Gollaha Fullinta Waqooyi Bari wuxuu mudnaanta siinayaa yagleelida warshado kalluumaysi, dhisida dekada Laasqoray iyo iibgaynta tuunada oo aduunku baahi wayn u qabo. Sidoo kale, barnaamijka Xukuumadda Waqooyi Bari waxuu qayb ka yahay Qorshaha Isbeddelka Qaran ee 2025 illaa 2029 kaasoo xoojinaya in isticmaalka kalluunka ee heerka qoys uu gaadho 3 kg ilaa 5 kg qofkiiba sanadka 2029.

Xukuumada Waqooyi Bari waxay dhiirri galin doontaa maalgashatayaasha Soomaalida iyo kuwo Caalamka iyadoo siinaysa ogolaansho kaluumaysi iyo dhul ay warshado kalluun ka dhistaan. Waxaa maalgashatada loo samayn doonaa canshuur dhaaf inta ay soo ceshanayaan maalgalintooda bilowga ah. Warshadaha iyo iskaashatooyinka kalluunku waxa uu yarayn doonaa shaqo yarida ka jirta deegaanka, waxuuna kordhin doonaa dhaqaalaha iyo horumarka Dawlad goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.

3. Maalgashiga Qurbajoogta

Qurbajoogta Waqooyi Bari waa mid ka mid ah tiirarka ugu muhiimsan ee dawladdhiska, waxay qayb libaax ka qaadan doonaan illaha dhaqaale, aqoonta, iyo halabuurrada ganacsi ee aan looga maarmin horumarinta bulshada. Taageerada dhaqaale ee ay ku yaboohayeen sadexdii sano ee ay dawladu jirtay iyo kaalinta soo jireenka ah ee ay ku taagerayeen qoysaskooda jooga Soomaaliya, waa mid mudan garowshiiyo iyo mahadnaqid. Hadaba, innagoo og baahida maalgashiga qurbajoogta, waxa barnaamijka xukuumaddu ahmiyad gaar ah siin doonaa in laga taageero qurbajoogta in ay helaan dhul ay ka dhistaan warshado, beero, xarumo kalluumaysi, iyo goobo dalxiis. Xukuumadu waxay canshuur-dhaaf u samayn doontaa ganacsiyada qurbajoogta sadexda sano ee ugu horaysa si ay ula qabsadaan deegaanka ganacsiga laga fulinayo.

4. Kobcinta Ganacsiga

Ganacsiyada curdanka ah waxay muhiim u yihiin abuurista fursado shaqo, kororka dhaqaalaha, iyo hoos u dhigida saboolnimada. Si loo yareeyo caqabadaha in ganacsiyada yaryar ay u gudbi waayaan heer dhexe ama sare, Barnaamijka Xukuumaddu waxa uu mudnaan siinayaa in uu dajiyo siyaasada halabuurka ganacsiga iyo cilmi baadhista taasoo siin doontaa bulshada danaynaysa ganacsiyada warbixin wadata cadaymo tiraysan ama tiraabaysan (qualitative or quantitative data) oo ay uga go'aan qaadan karaan nooca ganacsi ee dhalin kara faa'iido wax ku ool ah. Barnaamijka Xukuumaddu waxa kale oo uu xooga saari doonaa in ay ka taageerto ganacsiyada yar yar, maamulka iyo maaraynta ganacsiga si loo helo ganacsiyo waara oo keena shaqaalaysiin mug leh.

Siyaasada maalgashiga ganacsiga waaweyn ee xukuumadu waxa uu mudnaan wayn siin doonaa in ay soo jiitaan maalgashiga ganacsatada Soomaaliyeed iyo kuwa Caalamka. Shirkadaha waaweyn waxay Xukuumaddu ka taageeri doontaa u fududaynta sharciga ganacsiga, astaynta dhul ganacsi oo (industrial business zone) u gaar ah shirkadaha, ka yaraynta canshuurta maalgashdayaasha Soomaalida iyo kuwa caalamka, iyo in ay u diyaariso siyaasado ganacsi oo furfuran oo ka dhigi kara Waqooyi Bari meel ganacsi oo shirkaduhu ku tartamaan. Qorshahan waxuu mudnaan wayn siinayaa inuu horumariyo siyaasada Wadaaga Adeeg Bixinta (Public Private Partnership) oo xoogga saaraya in Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari ay la gali karto shirkado gooni loo leeyahay hishiiska Wadaaga Adeeg Bixinta (PPP) taasoo ay ku maalgaliyaan mashaariicda dawladu aysan u haynin kharash taasoo keeni karta in ay wadaagaan maalgalinta iyo faa'iidada sanado la tirsan.

5. Horumarinta kaabayaasha Dhaqaalaha.

Xukuumadda Waqooyi Bari waxay u aragtaa in horumarinta kaabayaasha dhaqaaluhu ay tahay halbowlaha isku xidhaya dadka, xoolaha, badeecada, shaqaaalaha, iyo xogta, waxayna fududaysaa waxqabadka mashaariicda dawlada, ganacsiga, nolosha, iyo warbixinada danabaysan. Si arimahaas looga midha-dhaliyo, waxa ay xukuumadda Waqooyi Bari muhiimad gaar ah siin doontaa dhisida waddo isku xidha Laasqorey iyo Laascaanood, Dhamaystirka dhismaha wadada Laascaanood iyo Buuhoodle, dhismaha dekada Laasqorey, xoogga korontada jaban oo tamar siin kara warshadaha, iyo dhismaha iyo casriyaynta Garoonka Diyaarada ee Laascaanood.

Tiknoolijiyada casiriga ah ayaa lafdhabar u ah wadaaga xogta, isku socodka dadka iyo badeecada, iyo hawlagalada Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari. Si looga midha dhaliyo barnaamijkan loona horumariyo mareegaha qaybiya xogaha, waxay xukuumaddu xooga saari doontaa in ay Waqooyi Bari hesho khad hadal oo u gooni ah si looga maarmo khalkhalka ay keenaan xidhiidhada khadadka Dawlad Goboleedyada aan dersika la nahay.

Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Kordhinta Dakhliga gudaha
2. Casriyaynta Nidamka danabaysan ee aruurinta dakhliga iyo bixinta kharashaadka
3. Samaynta sharciga wadaagga adeegga bixinta (PPP)
4. Dhismaha kaabayaasha dhaqaalaha sida wadooyinka, garoomada, warshadaha korontada, kuwa wax soosaarka iyo dekadaha
5. Dhiirri galinta maalgashiga guud gaar ahaan qurba joogta
6. Kobcinta ganacsiyada yar yar iyo kuwa ku salaysan hal abuurka
7. Cayilinta iyo iibgaynta xoolaha
8. Dhiirri galinta kalluumaysiga
9. Kordhinta beeraha dalagga daruuriga ah soo saara.



Tiirka 4,aad: HORUMARINTA ADEEGGA BULSHADA

Tiirkan waxaa saldhig u ah horumarinta adeegyada aas-aasi-ga ah.

Tiirka Horumarinta Adeegga Bulshada wuxuu hirgalin doonaa bixinta adeegyada aasaasiga ah sida:

- Waxbarashada
- Caafimaadka,
- Biyaha,
- Korontada
- Xalka-waara,
- Daryeelka bulshada nugul,
- Xuquuqul insaanka, Horumarinta haweenka, iyo dhalinyarada,
- Fidinta iyo ilaalinta diinta islaamka, hiddaha iyo dhaqanka bulshada.

1. Horumarinta Adeegga Waxbarashada

Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya (DG-WBS) waxa ay ka faa'iidayaan doontaa qorshaha ay dajisay Dawladda Federaalka Soomaaliya ee sare u qaadidda waxbarashada, qorshahaas ayaa kor loogu qaadayaa tirada ardayda waxbarashada asaasiga ah 35% ilaa 75% oo da'doodu u dhaxeeyso 6-17 jir, iyadoo taa laga ambaqaadayo ayaa wasaaradda Waxbarashada ee Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya waxa ay dhisi doontaa ama dayac tiri doontaa ugu yaraan 100 dugsi, waxayna hawlgalin doontaa ugu yaraan 120 macalin oo cusub, waxaana la danabayn doonaa qaybo badan oo ka mid ah adeegga waxbarashada.

Waxaa sare loo qaadayaa 60% tirada ardayda dhigata dugsiyada farsamada gacanta (TVET), iyo gelitaanka ardayda jaamacadaha bilaabeysa, iyadoo la dhisayo ama la dayactirayo 3 xarumood oo dugsiyada farsamada gacanta, waxaana la aas aasi doonaa Jaamacadda Waqooyi Bari Soomaaliya.

Si loo horumariyo tayada waxbarasha, DG WBS barnaamijkan xukuumaddu waxa uu kor u qaadi doonaa tababarrada xirfadaha macalimiinta ee kor loogu qaadayo heerka baris aqoontooda. Sidoo kale, waxaa dib u qiimayn lagu samayn doonaa, lana hirgelin doonaa nidaamyada dowladda federaalka ee casriyaynta habka dhaqangelinta manhajka qaranka.

Si loo xaqiijiyo bixinta adeeg waxbarasho oo loo simman yahay, DG WBS waxa uu kordhin doonaa diiwaangelinta waxbarasho ee bulshada qeybaheeda nugul, iyadoo la ilaalinayo isu dheelli tirka wiilasha iyo gabdhaha, isla markaana waxaa laga hawlgali doonaa dhiirri galinta

ku nagaanshaha gabdhaha waxbarasaha heerarkeeda sare. Dawladdu waxey kaloo dadka baahiyaha gaarka ah qaba ku taageeri doontaa agab waxbarasho si fursadahooda waxbarasho kor loogu qaado. Dadaaladaasi waxey gacan ka geysanayaan in ay abuuraan hannaan waxbarasho loo dhan yahay, tayo sare leh oo ay yeeshaan bulshada degaanka Waqooyi Bari Soomaaliya.

2. Horumarinta Adeegga Caafimaadka

DG-WBS waxaa ka go'an in uu dib u habayn ku sameeyo adeegga iyo tayada caafimaadka degaannada Waqooyi Bari Soomaaliya, taas oo qayb ka ah Qorshaha Isbeddelka Qaranka I (QIQ1), si loo xoojiyo helitaanka adeegyo caafimaad oo tayo leh, oo ku baahsan dhammaan degaannada WBS oo dhan. Hiigsiyada hortabinta leh waxay mudnaanta siinayaan adeegga caafimaadka hooyada iyo dhallaanka, iyadoo lagu bar tilmaameedsanayo in la dhimmo heerarka dhimashada hooyada, dhallaanka, iyo carruurta 50% marka la gaadho 2030 iyada oo loo marayo baahinta adeegyada Caafimaadka Taranka, Hooyada, Dhallaanka, Carruurta, iyo Dhallinyarada, kor u qaadista adeegga tallaalka, iyo xoojinta barnaamijyada nafaqada.

Si loo helo shaqaale caafimaad oo xirfad iyo aqoon leh oo u adeegga bulshada, DG WBS waxay dadaal u galaysaa in ay shaqaalaysiisoo 4,000 xirfadle caafimaad, oo ay ku jiraan 700 oo haweenka adeegayaasha caafimaadka bulshada. Sidoo kale maamulku waxa uu baadi goobayaa tababarrada takhasusaadka gaarka ah oo aan waddanka ka jirin sida daaweynta gurmada degdegga ah, kansarka (Kaankaro), daawaynta cudurrada maskaxda caruurta naafeeya, iyo qalliimada wadnaha.

Si loo xoojiyo horumarinta adeegga caafimaadka, DG WBS waxa uu casriyeyn doonaa 2 isbitaal kuwaas oo bixin doona adeegga caafimaadka takhasuska ah iyada oo ay iska-kaashanayaan dowladda iyo ganacsatada (PPPs).

Si loo hubiyo tayada daawada iyo agabka caafimaadka ee ay bulshadu isticmaasho, waxaa Dawlad Goboleedku si dhaw ula shaqayn doonaa hannaanka iyo halbeegyada Hay'adda Qaranka ee Maamulka Dawooyinka ay dejisay iyo shuruucda kale ee dalka taasoo dammaanad qaadi doonta badqabka, waxtarka, iyo tayada daawooyinka iyo agabka caafimaadka.

DG WBS waxa ay qaadan doontaa xalka caafimaadka dhijitaalka ah, oo ay ku jiraan nidaamka diiwaangelinta adeegga caafimaadka danabaysan iyo ballaarinta adeegyada fogaan arag (Telemedicine), gaar ahaan degaannada aan adeegga caafimaadku si fiican u gaarin.



3. Helidda Daryeel Bulsho oo loo dhanyahay

DG-WBS waxa ay dib-u-habayn iyo casriyeyn ka hirgalin doontaa magaalooyinka waawayn ee WBS, waxayna sare u qaadi doontaa kaabeyaasha dhaqaalaha, nadaafadda, iyo amniga, iyadoo dib-u-dejin loogu sameynayo dadka ku nool degaannada aan la qorsheyn si ay u helaan guryo la qorsheeyey oo leh adeegyada lagama maarmaanka ah.

Helitaanka biyo nadiif ah oo la awoodi karo waxay muhiim u tahay xasilloonnida iyo koboca dhaqaalaha dowlad goboleedka WBS, balse waddanku wuxuu wajahayaa caqabado waaweyn, maadaama ilaha biyaha shaqeynayo ay yaryihiin. Dhibaatooyinka sida isbeddel xilliyeedka, qiimaha sare ee biyaha, iyo tayo xumida biyaha ayaa sii kordhaysa. Sidaa daraadeed, WBS waxay dib-u-dayactiri doontaa ila biyoodyada u baahan dayactirka, ballaarinta nidaamyada biyo-soo-saarka tamarta qorraxda ku shaqaysa, iyo horumarinta shabakadaha waraabka si loo hubiyo helitaan siman oo waara.

DG-WBS wuxuu kordhin doonaa daboolka baahiyaha biyaha degaanka. Si tayada biyaha loo hagaajiyo, WBS waxay dhisi doontaa shaybaarka Biyaha, kaasoo hirgelinayaa xarumo yaryar iyo warshado lagu sifeeyo biyaha.

Waxaa la ballaarin doonaa kaalmada bulshada, aasaasidda nidaamka caymiska bulshada, fududeynta helitaanka shaqo, iyo horumarinta adeegyada daryeelka bulshada iyo xuquuqda carruurta.

DG-WBS waxay yaraynaysaa heerka shaqo la'aanta dhalinyarada WBS. Sidoo kale waxaa la kordhin doonaa dhisidda kaabeyaasha (Xaruumaha) cayaaraha, abuuridda fursado waxbarasho xirfadeed oo loo fidinayo dhalinyarada, dhiirrigelinta ganacsiga dhalinyarada, dhisidda garoon cayaareed, iyo dayactirka garoomada cayaaraha degaannada WBS.

Waxa ay dawladdu Hirgelin doontaa nidaamka uruurinta Zakada iyo waqafka, iyo xoojinta madarasadaha qur'aanka, si loo xoojiyo nabadda iyo wada-noolaanshaha bulshada. Sidoo kale waxaa la ilaalinayaa dhaqanka islaamka suuban, dhaqanka bulshada degaanka WBS iyo guud ahaan dhaqanka umadda Soomaaliyeed, iyadoo sare loo qaadayo dalxiiska iyo warbaahinta. Waxaa la dayactirayaa tiyaatarrada degaannada WBS, waxaana la taageeri doonaa dhaqanka iyo sooyaalka.

4. Dhawrida Deegaanka iyo Adkaysiga Cimilada.

- **Kobaca Cagaaran**

Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya waxay si wayn uga qayb qaadanaysaa geeddi socodka isbeddelka lagu gaadhayo kobaca cagaaran, iyadoo oo uu ka faa'iidsanayo fursadaha horumarka waara iyo ilaalinta deegaanka, isla markaana isu dheellitirayo horumarka dhaqaale iyo badqabka deegaanka. Barnaamijka Xukuumaddu waxa uu diiradda saarayaa dib-u-habaynta nidaamka deegaanka iyo ilaalinta kala-duwanaanshaha noolaha, oo ay ku jiraan dib-u-soo celinta dhul burburay ama xaalufay, beerista ugu yaraan 1 milyan oo geed oo adkaysi u leh abaaraha, iyo xakamaynta 10,000 "metric tons oo CO₂" ah.

Waxaa dib loo soo noolaynayaa dhisidda beeraha nasashada, tira koobidda iyo taageerada aagagga badbaadinta u baahan, xeryaha duurjoogta lagu ilaaliyo, iyo kobcinta noolaha kala duwan.

Waxa ay xukuumaddu xoogga saari doontaa yaraynta dhuxusha iyo gubitaanka dhirta, Waxay dhiirrigelinaysaa ka faa'ideysiga kheyraadka waara, yareynta nuglaanta deegaanka, iyo fududeynta helidda noole kala duwan, iyada oo la odorasayo in 5,000 oo qoys lagu taageeri doono in ay dadaalladan ka helaan ilo dhaqaale.

Waxaa la xakamayn doonaa wasakhda, waxaana la xoojin doonaa ilaalinta tayada hawada iyada oo la dhisayo xarumaha la socodka tayada hawada, si hoos loogu dhigo heerarka wasakhda.

Caasimadda DG WBS waxaa laga hirgelin doonaa nidaam isku dhafan oo lagu maareynayo qashinka, kaasoo lagu hiigsanayo in qashinka dib loo warshadeeyo.

- **Yareynta Khataraha Masiibooyinka**

Yareynta Khataraha Masiibooyinka wuxuu mudnaan siinayaa la-qabsiga cimilada, xoojinta maaraynta masiibooyinka iyo ka hortagga khataraha. Iyada oo la dajinayo istiraatiijiyadda ku habboon, lana raacayo siyaasadda guud ee Qaran ee Isbeddelka Cimilada, Siyaasadda Qaran ee Deegaanka iyo Siyaasadda Qaran ee La- Qabsiga.

Waxaa diiradda la saarayaa xoojinta adkaysiga iyada oo la qaadayo tallaabooyin wax-ku-ool ah, lana dhimmayo tirada dadka ay masiibooyinku saameeyaan 50% marka la gaaro 2030.

Tallaabooyinka ugu muhiimsan ee xukuumaddu ay qaadi doonto waa hirgelinta istiraatiijiyad lagaga hortaggayo, laguna yareynayo saameynta masiibooyinka, sida isticmaalka tamarta dib loogu cusboonaysiin karo, oo ay ka mid yihiin tamarta qorraxda iyo dabaysha, iyo casriyeynta maamulka kheyraadka biyaha iyada oo la adeegsanayo teknooloojiyada horumarsan, sida nidaamyada ku shaqeeya tamarta qorraxda iyo khariidaynta GIS, si wax looga qabto biyo-yaraanta iyo taageeridda la qabsiga cimilada.




Xoojinta maamulidda iyo aqoonta la xidhiidha khatarta masiibooyinka waa lagama maarmaan, iyadoo diiradda la saarayo horumarinta ka hortagga masiibooyinka, yareynta saameyntooda, iyo qiimeynta khatarta.

Hagaajinta isku-dubbaridka hay'adaha, uruurinta xogta, iyo go'aan-qaadashada xog-oggaalnimada ku saleysan ayaa xaqiijinaya in dadaallada yareynta khatarta masiibooyinka si wax-ku-ool ah loogu dhex daro istiraatiijiyadaha WBS.

Barnaamijka Xukuumadda WBS waxa uu dhisi doonaa xarumaha maaraynta masiibooyinka, xoojinta la socodka amniga cunnada, la socodka iyo horumarinta u diyaar garowga khataraha, waxa ayna xukuumaddu gacan ka gaysan doontaa dhisidda adkaysi waara iyo jawaab celin wax-ku-ool ah oo lagu maareeyo masiibooyinka. Dadaalladan ayaa dhidibbada u taagaya yareynta khatarta masiibooyinka.

Halbeegyada Hortabinta leh:

- 
- A. Waxbarashada
1. Kordhinta helitaanka waxbarashada (Hoose, Dhexe, Sare, iyo TVET)
 2. Hagaajinta tayada waxbarashada.
 3. Horumarinta Kaabayaasha Waxbarashada.
 4. Hirgelinta dib u eegista manhajka.
 5. Ballaadhinta iyo xirfadiinta macallimiinta.
 6. Xoojinta sinnaanta & ka qaybgalka gabdhaha.
 7. Barnaamijka taageeridda naafada iyo dadka nugul.
 8. Abuuritaanka barnaamij gaar ah oo dhiirri galinaya Gabdhaha si ay u Joogteeyaan Waxbarashada.
- B. Caafimaadka
9. Dhisidda/Dayactirka xarumo caafimaad & isbitaallo, MCHs iyo farmasiyada iyo rugaha kale ee caafimaadka;
 10. Shaqaaleysiinta dhakhaatiir, kalkaaliyeyaal, umulisooyin iyo rugo caafimaad oo guurguura
 11. Mudnaan siinta caafimaadka hooyada & carruurta
 12. Wacyigelinta iyo Horumarinta Talaalka;
 13. Horumarinta iyo hirgelinta barnaamijyada nafaqada
 14. Abaabulka ololeyaasha caafimaadka hooyada iyo caruurta
 15. Abaabulka iyo hirgelinta wacyigelin & ka hortagga cudurrada faafa
 16. Xoojinta nadaafada degaanka iyo goobaha caafimaadka,
 17. Dhiirri galinta fayadhowrka goobaha, dawada iyo agabka caafimaadka,
- C. Ilaalinta deegaanka iyo adkaysiga Cimilada

18. Yaraynta Halista Masiibooyinka
19. Hirgelinta nidaamyada digniinaha hore;
20. Wacyigelinta bulshada;
21. Dhisidda unugyada ka jawaaba xaaladaha degdeg ah
22. Maareynta Kheyraadka sida dhira beerista, ilaalinta ciidda, kaydinta biyaha, iyo ilaalinta xeebaha
23. Dhisidda iyo horumarinta beeraha iyo dalagyada cimilada u adkaysta
24. Dhisidda haamaha keydka biyaha iyo waraabka

Tiirka 5,aad: XAQIJJINTA MAAMUL WANAAAGGA IYO CIRIB TIRKA MUSUQA

Tiirkan waxaa saldhig u ah Hay'ado danabysan (E- government) iyo musuq la'aan

Si loo xoojiyo maamul wanaagga, loo hubiyo hirgalinta adeegyada shacabka, loona dhiso saldhig adag oo horseeda xasillooni iyo barwaaqo waarta, waxaan shanta sano ee soo socota fulinaynaa qorshe balaadhan iyo ballan-qaadyo dhab ah oo ay xukuumaddu gaadhsiinayso muwaadiniinteeda. In loo dhanyahay qorshahaas si wada jir ahna looga shaqeeyo ayaa keeni doonta in aan dhagax dhigno marxalad cusub oo lagu naalloodo maamul wanaag iyo horumar wadaag ah. Hannaanka dawlad wanaaga aan fulinayno ayaa ah mid waafaqsan qorshaha qaran ee Soomaaliya, balse si gaar ah waxaa loogu habeeyey duruufaha iyo fursadaha gaarka ah ee Dawlad Goboleedka Waqooyi-Bari.

Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Si loo xoojiyo Dawlad Wanaaga, waxaa la iskula xisaabtami doonaa kaliya guulaha laga gaadho wax qabadka loo igmado wasaarad ama hay'ad walba.
2. Waxaa dallacsiin iyo Daraja siinta lagu qiimayn doonaa kaliya aqoonta iyo kartida, si loogu diyaar garoobana waxaa la siin doonaa shaqaalaha tababaro bartilmaameed leh (sida PFM, maaraynta mashaariicda, dijital).
3. Ayadoo la adeegsanayo aaladaha adeegyada dijitaalka ah ayaa waxaa la diiwaangelinayaa ganacsiga, lahaanshaha dhulka, aqoonsi dijitaal ah, taasoo kordhin doonta helitaanka dakhli huffan, isla markaana yarayn doonta musuqmaasuqa.
4. Waxaa la abuurayaa guddiyo kormeer oo isku dhaffan si ay ula socdaan tayada/horomarka mashaariicda.
5. Waxa ay dawladu bixin doontaa tababaro heer-sare ah oo loogu talagalay adeegga rayidka.
6. Waxaa dib u habayn lagu samayn doonaa nidaamka shaqaalaynta shaqaalaha dawladda.
7. Waxaa la ballaadin doonaa isticmaalka adeegyada dijitaalka ah.



Tiirka 6,aad: TAYAYNTA GARSOORKA IYO XAQIIJINTA CADAALADDA

Tiirkan waxaa saldhig u ah, Garsoor tayo leh iyo Sarraynta sharciga

Tiirkan waxa uu diiradda saarayaa kor u qaaddidda Tayada iyo aqoonta sharciga, waxa uu xaqiijinayaa in la helo cadaalad loo simanyahay, waxa uuna tababarro heer sare ah iyo aqoon is waydaarsiyo macna leh u abuurayaa kaadirka sharci dajinta iyo sharci yaqaanka ee Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari, Soomaaliya.

Waxaa dib u dhis lagu samaynayaa nidaamka garsoorka, ayadoo si casriyaysan loo habaynayoo loona qeexayo hannaanka shaqo ee shaqaalaha maxkamadaha, isla markaana la kobcinayo xirfadda iyo aqoonta garsoorayaasha.

Waxaa la kordhin doonaa xarumaha maxkamadaha si qof walba oo reer Waqooyi Bari ahi degmadiisa uga helo adeeg caddaaladeed, waxaana ay haweenka, dhalinyarada, dadka nugul, iyo bulshada qaybaheeda kala duwan ay si siman u heli doonaan xuquuqdooda dastuuriga ah iyo adeegyada dawladnimo.

Sida ku cad Dastuurka Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari, tiirkani waxa uu u taaganyahay ilaalinta xuquuqda dadka reer Waqooyi Bari, waxaana lagama maarmaan ah in ay xukuumadu ka shaqayso kaalinta kaga aaddan xuquuqda kala duwan ee ay leeyihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed ee ku nool Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.

Halbeegyada Hortabinta leh:

1. Dib u eegista shuruucda iyo siyaasadaha muhiimka u ah yagleelidda Garsoor hufan oo madax-bannaan, una dhisan sida ku cad dastuurka Waqooyi Bari.
2. Tayaynta iyo Korjoogtaynta Hay'addaha Cadaaladda iyo Garsoorka
3. Tayaynta iyo dib u habaynta Ciidamada Asluubta.
4. Daadajinta Adeegyada Garsoorka iyo dhiiri galinta xallinta khilaafaadka ku salaysan xeer Soomaaliga.
5. Isu soo dhawaynta nidaamka cadaaladda dawliga ah iyo cadaaladda soo jireenka ah ee shacabka.


GUNAANAD

Maamulka Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari, Soomaaliya ee uu hogaaminayo Madax Wayne Cabdiqadir Axmed Aw-Cali (Firdhiye), waxaa laga filayaa hawl qabad iyo hiigsi midho dhala, waxaana tira badan caqabaadka ku geedaaman gaadhitaanka hiigsiyadaas, sidaa darteed waxaa lagama maarmaan ah in si taxadar leh looga fikiro hirgalinta halbeegyada kor ku qoran, isla markaana loo diyaar garoobo safar dheer, lana hubiyo in la diyaariyo sahaydii lagu gaadhi lahaa horumarka iyo barwaaqada nabdoon ee ay tiigsanayaan dadka reer Waqooyi Bari Soomaaliya.

Fulinta Qorshaha kor ku xussan waa in loo horraysiiyaa xaqiijinta isku duubnida dadka reer Waqooyi Bari, baadi goobka nabad waarta oo dariska iyo dhexdoodaba ay ku naalloodaan.

Waxaa lagama maarmaan ah in si wayn looga baaraan dago sida ugu habboon ee lagu gaadhi karo isku filnaansho dhaqaale, oo ugu yaraan lagu dabbaro hawlaha aasaasiga u ah jiritaanka dawlad goboleedka Waqooyi Bari.

Ilaahay waxaan weydiisanaynaa in uu najixiyo dhismaha Dawlad Goboleedka Waqooyi bari, Soomaaliya, kana dhigo sababtii midnimada umadda Soomaaliyeed.



LIFAAQ 1 aad: QORSHE HOWLEEDKA GOLAHA WASIIRRADA XUKUUMADDA DAWLAD GOBOLEEDKA WAQOQYI BARI SOOMAALIYA, 2025 - 2030

“Difaac iyo Dawlad Dhis”

TIIRKA 1aad: DIFAACA IYO SUGIDDA AMNIGA

No.	HALBEEG	HOWL
	1. DIB-U-HABEYNTA IYO TAYAYNTA CIIDAMADA DIFAACA IYO HAY'ADDAHA AMNIGA	
1.1	Diyaarinta cudud ciidan oo hanata gacan ku haynta dhamaan dagmooyinka iyo dhulka DG- WBS.	- In la xaddido khataraha jira, kuwa gudaha iyo kuwa jiidda hore. - In Dowladda federaalka lagala heshiiyo sida loo wajahayo khatarta Waqooyi Galbeed - In la dar dar galiyo isku dhafka ciidamada si loo xaqiijiyo aasaasidda ciidan DG-WBS. - In dib u habayn tiro iyo tayo lagu sameeyo ciidanka DG-WBS (force generation). - In la daraaseeyo xiriirka ka dhexeeya amniga iyo dh-aqaalaha lana qeexo sida loo wajahayo - In la dajiyo siyaasadda nabadaynta iyo Xasilinta qa-baailka walaalaha ah.
1.2	Aasaasidda Hay'adaha amniga si ku salaysan dastuurka DG-WBS.	- Dhisidda hannaanka sirtoonka DG-WBS. - In la diyaariyo ciidamo u taba-baran ka-hortagga iyo Xakamaynta rabshadaha shacabka. - Dajinta siyaasadda Amniga DG-WBS. - Diyaarinta howlaha amni ee hortabinta leh. - Dajinta Sharciga Hay'adaha amniga yo shuruucda la xidhiidha.
	2. HOWLGALLADA DIFAACA IYO DIB-U-XOREYNTA	
2.1	U diyaar garawga difaaca soohdimaha DG-WBS iyo dib u xoreynta dagmooyinka maqan	- In la diyaariyo qorshe lagu hirgalinayo howlaha dib u xoreynta ee ku qeexan Tiirka amniga iyo cadaaladda - In la dhiirri galiyo in bulshooyinka daga dagmooyinka aan xorta ahayn ay garab istaagaan Maamul Daadejinta DG-WBS. - Diyaarinta saadka ciidamada Difaaca ku jira. - Tayaynta iyo qalabaynta ciidamada difaaca. - Dejinta istraatiijiyad howlgallo dib u xoreyn midaysan oo ka hirgala DG-WBS oo dhan.

3. ARRIMAHHA XASILINTA		
3.1	Istiraatiijiyadda Xasilinta	- Dajinta qorshaha iyo siyaasadda arrimaha Xasilinta ee DG-WBS. - Fulinta qorshaha xasilinta loo dhanyahay, Dhamaan Degmooyinka iyo Caasimadda WBS.
3.2	Isuduwidda Arrimaha Xasilinta	- In la aas aaso guddi-hawleedka wasaaradaha iyo hay'adaha ka shaqeeya arrimaha xasilinta. - In la diyaariyo baraaamijka xasilinta degmooyinka iyo tuulooyinka ay dagaaladda iyo khilaafyadu saamayeen ama saamayn doonaan.

TIIRKA 2aad: DAADAJINTA DAWLADA IYO DIMUQRAADIYANTA

1. DAADAJINTA DAWLADNIMADA IYO KALA XADAYNTA MAS'UULIYADAHHA		
1.1	Xoojinta iyo sugidda maamulka Hay'addaha Dowladda	- Diyaarinta xeerka kala xadaynta iyo qaab-dhismeedka hay'addaha dawladda. - Meelmarinta xeerka kala xadaynta iyo qaab-dhismeedka hay'addaha dawladda (Ordinance).
1.2	Daadjinta maamulka iyo awood siinta dagmooyinka	- Kobcinta Awoodda Dhaqaale iyo Maamul ee maamulada degmooyinka. - Xoojinta kala soocnaanta awoodaha hay'adaha DG-WBS - Dardargalinta dhismaha golayaasha dowladda-ha-hoose. - Daadajinta Adeegyada Dowladda iyo u dhawaynta bulshada. - Daadjinta masuuliyadda maaliyadeed ee heer dagmo. - Hubinta in macallimiinta iyo shaqaaluhu si rasmi ah u dagaan dagmooyinka ay ku qoranyihiin.
2. DHAB U HESHIIN		
2.1	Diyaarinta iyo fulinta Istiraatiijiyadda DG-WBS ee Dhab u Heshiinta.	- Diyaarinta iyo anisixinta Istiraatiijiyadda DG-WBS ee Dhab u heshiinta. - Diyaarinta qorshe howleedyo lagu fulinayo, laguna daba galayo arrimaha heshiisiinta qabaaalka walaalaha ah ee deggan DGWBS - Abuurista Barnaamijyo wacyigalin/nabadayn iyo xallinta khilaafaadyada ee dadka reer WBS dhexdooda.



2.2	Arrimaha wadahaadallada Soomaaliland.	- Magacaabidda guddi abuurta jawi wada hadal iyo mid nabadeed oo lala yeesho DG eedyada dariska ah. - Samaynta wada shaqayn dhaw ee DG-WBS ay la yee-lanayso DFS, si looga arrinsado istraatiijiyadda wada-hadallada DGWBS iyo Somali land. - Diyaarinta agendayaasha iyo qorshaha DGWBS ee lagu aburi karo wada noolaansho iyo daris wanaag.
-----	---------------------------------------	---

3. QABASHADA DOORASHO QOF IYO COD, XOR IYO XALAAL AH

3.1.	Dimoqraadiyaynta iyo dardargalinta doora-shooyinka	- Diyaarinta barnaamijka wacyi galinta muwaadinka ee xaqqa doortaha iyo la doortaha. - Diyaarinta kaabayaasha doorashoyinka ee dhanka sugidda amniga, iyo xaddidaadda goob doorashooyin-ka.
------	--	--

TIIRKA 3aad: HORUMARINTA DHAQAALAH

1. HORUMARINTA DHAQAALAH, NIDAAMINTA IYO KORDHINTA DHAKHLI-GA DG-WBS

1.1	Baahinta iyo kordhinta Canshuuraha iyo ilaha dakhliga dhaqaalaha ee DG-WBS si loo gaadho isku filnaansho miisaani-yadeed	- Diyaarinta qorshe ama istraatiijiyad isku filaansho miisaaniyadeed. - Diyaarinta iyo habaynta illaha dakhliga ee WBS. (Bad iyo Barri, Xuduud iyo soohdin). - Dabagalka iyo wada shaqaynta shirkadaha iyo bangi-yada sida gaarka ah loo leeyahay si loo maareeyo qul-qulka lacagaha dhex maraya ama lagu dhex isticmaalo DG-WBS. - Dib u eegista hannaanka dakhli uruurinta iyo istic-maalka tiknooloojiyada. - Wacyi galinta bulshada ee adeegga iyo waajibaadka. - Abuurista hay'adda dakhli uruurinta ee heer gobol iyo mid degmo
1.2	Daba galka iyo helitaan-ka deeqaha guud.	- Ka qayb qaadashada dardar-gelinta barnaamijka dayn cafiska guud ee dalka. - La xisaabtanka DFS iyo gudbinta codsiyada kabka miisaaniyadda ee DG-WBS. - Abuuritaanka Saaxiibbo dawli ah oo kaba dhaqaalaha DG-WBS
1.3	Samaynta nidaamka iyo qorshaha dakhliga furadaha qalallan	- Dajinta habraacyada dakhli Ururinta furadaha qala-lan. - Hirgalinta nidaam danabaysan oo lagu uruuriyo dakh-liga furadaha qallalan.

1.4	Samaynta nidaamka dhaqaale ee wada shaqaynta DG-WBS iyo Shirkadaha/hay'adaha dhaqaale ee gaarka loo leeyahay.	- Taaba galinta awoodda shaqo ee wasaaradda maaliyadda iyo hay'adda/xafiiska dakhli uruurinta ee WBS. - Samaynta warbixinno danabaysan ee nidaamka maamulka maaliyadda - Dejinta qorshaha illaalinta lacagta la dhaqo, iyo maalgalinta xagjirka.
2. KOBICINTA DHAQAALAH, GANACSIGA IYO WAXSOOSAARKA DALKA		
2.1	Horumarinta Wax Soo Saarka khayraadka ceegaaga dhulka DG-WBS sida Shidalka, Macdanta, Beeraha, Kalluunka, Xoolaha, iwm	- Dib u eegis in lagu sameeyo shirkadaha ku hawllan arrimaha macdanta. - In wadahalad laga galo DFS iyo Maamullada dariska ah arrimaha wadaagga kheyraadka laga helo soohdimaha la wadaago. - Ka qayb qaadashada heshiisyada kaluumaysiga ee lala galayo shirkadaha iyo dawladda caalamka.
2.2	Dhiirigalinta maalgashiga dalka	- Dhiirri galinta shirkadaha iyo hay'adda maalgashiga iyo ilaalinta sharciga maalgashiga iyo maalgashadaha ee Soomaaliya. - Diyaarinta mashaariic dhamaystiran (feasibility, costing and impact assessment). - Dhiirigalinta Iskaashiga u dhexeeya dawladda, shirkadaha gaarka ah iyo hay'adaha dawlaga ah (PPP).
2.3	Ku biiridda heshiisyada wax-soo saarka wadaagga shidaalka (oil & Gas) ee DG yada iyo DFS.	- Wada xaajoodka DG-WBS iyo DFS ee arrimaha soo saaridda khayraadka ceegaaga Dhulka DG-WBS. - Dajinta Qorshaha ka faa'iidsiga waxsoosaarka Shidaalka.
2.4	Horumarinta khayraadka badda	- In la abuurdo awoodaha kormeerka iyo illaalinta khayraadka badda ee xeebaha WBS - In wada hadal laga galo arrimaha heshiisyada iyo siyaasadaha wadaagga kheyraadka dalka. - In laga qayb qaato bixinta shatiyadda kaluumaysiga.
2.5	Dhiirigelinta Ganacsiga Gaarka ah iyo ganacsiyada yar-yar.	Diyaarinta sharciyada iyo xeerarka WBS ee horumarinaya ganacsiga gaarka ah.
2.6	Horumarinta Tayo-dhawrka iyo la shaqaynta hay'adda tayo dhawrka DFS.	- Furitaanka xafiisyo ay leedahay hay'adda tayo-dhawrka qaranka ee ka hawl gala DG-WBS, kuwaasoo ay qayb ka tahay DG-WBS. - In la hirgaliyo dhamaan hab-raacyada tayo-dhawrka. - In la sameeyo xarumo qalabaysan oo lagu hubinayo tayada alaabta lagu isticmaalayo ama laga dhoofinayao DG-WBS.



2.7	Horumrinta kaabayaasha Dhaqaalaha (Dekadaha, Eeriboodhada, jidadka, marsooyinka, etc.)	- In la dajiyo qorshaha DG-WBS ee dhisidda kaabayaasha dhaqaalaha, gaar ahaan kuwa sahlaya sugidda aminga sida buundooyinka, jidadka, garoomada (air-strips) iyo dekadaha. - In la soo dhaweeyo, lagalana shaqeeyo DFS sidii loo heli lahaa maalgashiga wadaaga ah ee kaabayaasha dhaqaalaha PPP/BOT (Build Operate and Transfer).
2.8	Horumarinta Warshaddaha iyo Tamarta	- In la abuuro siyaasadda lagu maamulayo waxsoosaarka, kaydinta, gudbinta iyo qaybita tamarta, iyadoo wax laga baranayo siyaasadaha guud ee dalka - In la abuuro ugu yaraan hal mashruuc oo lagu hirgalinayo soo saarista tamarta la cusboonaysiiyo si tamar qiimo jaban loo helo. - In la dhiirigaliyo warshadaynta iyo warshadaha si loo kobciyo wax-soosaar midho dhal ah.
2.9	Kafaa'iidsiga teknoolajiyadda casriga ah	- Dhiirigalinta hal-abuuridda ganacsiga ee tiknoolajiyadda. - Dib u habaynta howlaha lsgaadhsiinta iyo Kafaa'iidsiga tiknoolajiyadda.
2.10	Xoojinta xidhiidhka jaaliyadaha ka soo jeeda DG-WBS ee dalka dibadiisa ku nool	- Samaynta xafis u gaar ah jaaliyadaha iyo isu duwidda dadaalladooda. - In la sameeyo kulan sannadla ah oo ah isugu yimaadan dhamaan jaaliyadaha reer WBS iyo maamulka dawladdu. - In la joogteeyo gurmada loo fidinayo dadka reer WBS ee ku dhibaataysan meelaha kala duwan ee dunida daafaheeda.

TIIRKA 4aad: HORUMARINTA ADEEGGA BULSHADA

1. MAARAYNTA MASIIBOYINKA IYO XAALADAH BINI'AADINNIMO

1.1	Tayaynta Hay'adda ama xafiiska Maaraynta masiibooyinka iyo midaynta dadaalladda xal u helida Xaaladaha Bini'aadinnimo.	- In loo diyaar garoobo masiibooyinka dabiiciga ah iyo kuwa kale ee soo noqnoqda. - In wada shaqayn dhaw lala yeesho hay'adaha ku hawllan howlagallada gurmada degdeg ah sida abaaraha. - In la qoondeeyo Miisaaniyad u gaar ah howlaha gurmada degdegga ah ee ka dhici kara WBS. - Diyaarinta qorshaha DG-WBS ee ka hortagga masiibooyinka soo noqonoqda sida Abaaraha, iyo cudurrada faafa. - La falgalka iyo fulinta Istiraatiijiyadda Xalka Waara ee u daggan DFS (Durable solutions).
-----	--	--

	2. HORUMARINTA ADEEGYADA BULSHADA	
2.1	Horumarinta Waxbarashada, Tacliinta sare iyo Tiknoolajiyadda	• In la hir galiyo qorshaha kordhinta tirada iyo tayada waxbarashada hoose dhexe iyo sare ee iskuullada DG-WBS. • Xaqiijinta gaarsiinta agabka waxbarashada dhammaan degmooyinka ka tirsan DG-WBS. • In la dhiso ugu yaraan 20 dugsi hoose/Sare si loo kordhiyo tirade iyo Tayada waxbarashada. • Horumarinta waxbarashada xirfadaha lagu shaqeys-to ee dadka waaweyn iyo kuwa aan helin fursadaha waxbarasho. • Yagleelidda Xarumo Tababar Farsamo oo lagu barto farsoomyinka iyo xirfadaha la jaanqaadaya qalabyada casriga ah ee sii baahaya. • Samaynta xarumo lagu xannaaneeyo carruurta laguna barbaariyo • In la sameeyo xarumo lagu ciyaaro, lagu nasto, waxna lagu barto.
2.3	Horumarinta adeegga caafimaadka ee asaasiga ah	• In loo helo isbitaallada magaalooyinka DG-WBS qalabka qalliinka, iyo qalabyada guud ee daawaynta bukaanka degdegga ah. • In la helo gaadiidka bukaan la roorka oo loo qaybiyo xarumaha caafimaadka • In la xoojiyo isku xidhka iyo tayeynta goobaha lagu bixiyo adeegyada asaasiga ah ee daryeelka caafimaad. • Dabagalka iyo xakamaynta tayada dawooyinka soo gala WBS. • Dhismaha xarumo caafimaad degmooyinka DG-WBS. • Hubinta iyo la socodka tayada iyo hufnaanta adeeg bixinta caafimaad ee isbitaallada gaarka loo leeyahay. • Dhisidda isbitaal gaar u ah hooyada iyo dhallaanka.
2.4	Horumarinta biyaha iyo tamarta	• Diyaarinta iyo fulinta mashaariicda biyo galinta, biyo nadiifinta iyo qaybinta caasimadda. • Dhismaha sheybaarka baaritaanka Tayada Biyaha. • Diyaarinta iyo fulinta Mashaariicda Biyo gelinta Magaalooyinka Badhan iyo Buuhoodle. • Qodida iyo Dayactirka ugu yaraan 20 ceel oo dhaad-heer kuwaas oo kamid ah mashaariicda hormarinta adeega biyaha ee degmooyinka iyo tuulooyinka. • La shaqaynta iyo hirgilinta Siyaasadda Fayo dhowrka Biyaha ee Soomaaliya.
	3. ARRIMAHA DEEGAANKA IYO YARAYNTA SAAMAYNTA ISBEDDELKA CIMILADA	



3.1	Ilaalinta deegaanka iyo yaraynta saamaynta arrimaha isbedelka cimilada	- In laga qayb qaato hirgalinta ol-olaha dhiraaynta iyo ka hortagga nabaad guurka. - Diyaarinta qorshe gaar u ah WBS ee ka hortagga qashinka/sunta halista ah ee xuduudaha ka gudubta ama wadamadu isu dhoofiyaan. - Ka qayb qaadashada iyo fulinta wacyi-galinta ay waddo DFS ee ku saabsan badbaadinta duurjoogta, xaalufinta dhirta qoyan ee dhuxusha laga sameeyo iyo dhiirigelinta isticmaalka tamaraha kale sida LPG (gaasta wax lugu karsado).
-----	--	---

4. DARYEELKA IYO ILAALINTA XUQUUQDA BULSHADA

4.1	Ilaalinta iyo Daryeelka Bulshada	- Ka qayb noqoshada adeegyada iyo barnaamijyada xanaanada danyarta (Social Safety net) iyo ka jawaabidda dhibaatooyinka sida kadiska ah ku yimaada (Shock Responsive). - Ilaalinta xuquuqda aadanaha gaar ahaan kuwa itaalka darán ee bulshada. - Dib u dajinta dadka barakacayaasha ah iyo kordhinta adkeysigooda.
-----	----------------------------------	---

TIIRKA 5aad: XAQIJJINTA MAAMUL WANAAGGA IYO CIRIB TIRKA MUSUQA

	1. HIR GALINTA MAAMUL WANAAGGA IYO CIRIB TIRKA MUSUQA	
1.1.	Dib u habaynta iyo Shaqaalaynta Shaqaalaha DG- WBS (Xuquuq iyo Waajibaad)	- Daraasaynta sharciga shaqaalaha rayidka ee DFS, iyo in la helo hannaan ay DG-WBS uga faaiidaysan karto ama sharci gaar ah ku samaysanayso. - Samaynta iyo meel marinta siyaasadda jaangoynta darajooyinka iyo mushaaraadka shaqaalaha DG-WBS. - Fulinta iyo dardargalinta xeer nidaamiyayaasha iyo habraacyada hagaya shaqaalaha DG-WBS. - Diyaarinta nidaam danabaysan ee lagu ilaaliyo xogta shaqaalaha DGWBS.
1.2.	Xoojinta, tayaynta aqoonta kartida iyo xirfadaha Shaqaalaha DG-WBS	- Qabashada taba-barro aasaasi ah si shaqaaluhu ula falgalaan himilooyinka DG-WBS - Hirgalinta iskaashi dhex mara jaamacadaha gaarka loo leeyahay, hay'adaha caalamiga ah, DG-WBS, iyo DFS, si shaqaalaha WBS looga haqab tiro xirfadaha iyo aqoonta ay u baahanyihiin si ay waajibaadkooda u gutaan.

1.3.	Dhiirigalinta daah-furnaanta, iyo is-la-xisaabtanka Hey'adaha Dowladda	- In si daahfuran loola shaqeeyo Hantidhawraha DG-WBS. - Dabagalka iyo fulinta talobixinta Hanti Dhowrka DG-WBS - Abuuridda hannaan lagula xisaabtamo hay'addaha Dawliga ah, kuwa gaarka ah iyo kuwa aan dawliga ahaynba.
------	--	---

TIIRKA 6aad: TAYAYNTA GARSOORKA IYO XAQIJJINTA CADAALADDA

	1. ARRIMAHA GARSOORKA IYO CADAALADDA	
1.1	Diyaarinta shuruucda iyo siyaasadaha muhiimka u ah aas-aasidda Garsoor hufan oo mad-ax-bannaan.	- In la diyaariyo lana ansixiyo sharciga Golaha garsoorka DG-WBS, kaasoo la jaanqaadaya Hannaanka cadaalada iyo garsoorrada dalka. - In dib u eegis lagu sameeyo hay'adaha garsoorka ee hadda ka jira, lagana faaiidaysto khibradooda.
1.2	Tayaynta iyo Korjoogtaynta Hay'addaha Cadaaladda iyo Garsoorka ee WBS	- Diyaarinta Qorshaha Horumarineed ee 5 sano ee Hey'adaha Garsoorka (Justice Sector Plan). - In la sameeyo qorshe howleedka Hay'adaha Garsoorka iyo cadaaladda oo laga hirgaliyo dhamaan DG-WBS.
1.3	Diyaarinta, tayaynta iyo habaynta Ciidamada Asluubta-WBS	- Diiwaan galinta ciidanka asluubta. - Diyaarinta Qorshaha tayaynta iyo hawl-galinta ciidamada Asluubta. - Dhamaystirka adeegga Xabsiyada iyo qawaaniintooda. - Tababaridda iyo kor u qaadista kartida iyo tayada ciidanka Asluubta.
1.4	Daadajinta Adeegyada Garsoorka iyo dhiirigalinta	Abuurista maxkamadaha guur-guura.
	xalinta khilaafaadka ku salaysan xeer Soomaaliga	Dhiirigalinta dhaqanka iyo xeerarka xallinta khilaafaadka ee aan ka hor imaanayn diintaana suuban iyo shuruucda dalka.





**DIFAAC
IYO
DAWLAD DHIS**